

# Shirkadda Shabakada Gaadiidka (TNC)

## Ogeysiiska Xuquuqda Darawalka ee waafaqsan Xeerka Mushaarka Ugu Yar ee Gobolka Washington

Ogeysiiskan waxaa loogu talagalay in uu ku wargeliyo darawalada TNC ee Gobolka Washington xuquuqdooda si waafaqsan [RCW 49.46.300](#). Hadaad darawal tahay, shirkadaada shabakada gaadiidka waa in ay ku qaybisa Ogeysiiska Xuquuqaha Darawalka barnaamijyada telefoonka casriga ah ama madasha barta internet-ka, oo ugu yaraan ah luuqadahan soo socda: Af-Ingiriis, Af-Isbaanish, Af-Shiinees, Af-Fiitnaamees, Af-Ruush, iyo Af-Kuuriyaan.

### Qiimayaasha Magdhowga Ugu Yar

Laga bilaabo 1-da Jannaayo, 2024, darawal ahaan, TNC-gaaga waa in uu bixiyaa ugu yaraan qiimayaasha lagu sharxay shaxdan soo socota oo loogu talagalay safar kasta ama qaybta safarka ah.

Qiimayaasha darawalka ugu yar ee 2024 Loogu talagalay safar kasta ee loo diro	Safarrada ka bilaabanaya gudaha magaalada Seattle kuna dhammaanaya meel kasta, ugu badan:	Safarrada ka bilaabanaya bannaanka magaalada Seattle, kuna dhammaanaya bannaanka magaalada Seattle, ugu badan:	Safarrada ka bilaabanaya bannaanka magaalada Seattle, kuna dhammaanaya gudaha magaalada Seattle, ugu badan:	
			Iskujirka:	
Daqiiqadda madal rakaab kasta ee loogu talagalay dhammaan waqtiga madasha rakaabka ee safarkaasi	\$0.66	\$0.38	\$0.66 ee lagu dabakhey qaybta waqtiga madasha rakaabka ee ka dhaceysa gudaha magaalada Seattle	\$0.38 ee lagu dabakhey qaybta waqtiga madasha rakaabka ee ka dhaceysa bannaanka magaalada Seattle
<b>Lagu darey</b>	<b>Lagu daray ama intaas sii dheer</b>	<b>Lagu daray ama intaas sii dheer</b>	<b>Lagu daray ama intaas sii dheer</b>	<b>Lagu daray ama intaas sii dheer</b>
Maylka madasha rakaab kasta ee loogu talagalay dhammaan maylasha madasha rakaabka ee gaariga la wadey safarkaasi	\$1.55	\$1.31	\$1.55 ee lagu dabakhey qaybta fogaanta inta mayl ee madasha rakaabka ee ka dhaceysa gudaha magaalada Seattle	\$1.31 ee lagu dabakhey qaybta fogaanta inta mayl ee madasha rakaabka ee ka dhaceysa bannaanka magaalada Seattle
<b>Ama</b>	<b>Ama</b>	<b>Ama</b>	<b>Ama</b>	
Inta ugu yar ee safar kasta ee loo diro	\$5.81	\$3.37	\$5.81	

Ogow: Qiimayaasha magaalada Seattle ayaa sidoo kale lagu dabakhi karaa magaalo kasta ee ku taalla Washington oo dadkeedu ka badan yahay 600,000. Hadda oo ay tahay Disembar 2023, Seattle waa magaalada keliya ee ku taalla Washington oo ku dhaqan dad ka badan 600,000 oo ah heerka ugu yar ee uu sharci ugu xaddidey ee loo adeegsadey in lagu dabakho qiimayaasha safarka.

### Gaadiidka La Wadaago

TNC-yadu waa in ay ula dhaqmaan gaadiid-raaca loo wadaago sida hal safar ahaan ee bilaabanaya marka

Sida ku cad xeerarka RCW 49.46.300(7) iyo WAC 296-128-99110(2) shirkadda shabakada gaadiidka waxay ka soo bixi kartaa waajibadkeeda si ay u qaybiso ogeysiiska qoran ee xuquuqaha darawalada shirkada shabakada gaadiidka iyaga oo ku siinaya ogeysiiskan fudud nidaam la qaari karo.

rakaabka koowaad uu gaariga soo galo kuna eg marka rakaabka ugu dambeeya uu gaariga ka baxo. Dejinta/qaadista rakaabka dheeraadka ah inta safarka lagu guda jiro looma xisaabiyo gaadiid-raac gaar ah ahaan, laakiinse waxaa loo isticmaalaa go'aaminta qiimayaasha ugu yar ee safarka loo adeegsan karo. TNC-yadu waa in ay codsadaan qiimaha ugu yar ee ugu sarreeya ee la adeegsan karo inta lagu guda jiro qayb kasta ee gaadiid-raaca la wadaago ee safarka oo dhan.

Tusaalooyinkan soo socda waxay qeexayaan magdhowga ugu yar ee loogu baahan yahay xaaladaha la hal-abuuray ee gaadiidka la wadaago ee kala duwan.

*Tusaalaha 1: Waxaad gaadiid-raaca la wadaago ka bilowday bannaanka magaalada Seattle, waxaadna qaadis dheeraad ah ka sameysay gudaha magaalada Seattle, iyo ku dejinta dhammaan rakaabka bannaanka magaalada Seattle.*

TNC waa in ay ku siisaa qiimayaasha Seattle ee guud ahaan gaadiid-raaca la wadaago sababta oo ah waxaad dad ka qaaday magaalada gudaheeda.

*Tusaalaha 2: Waxaad gaadiid-raaca la wadaago ka bilowday bannaanka magaalada Seattle, waxaadna qaadis dheeraad ah ka sameysay bannaanka magaalada Seattle, waxaadna rakaabka ugu dambeeya ku dejisay bannaanka magaalada Seattle.*

TNC waa in ay ku siisaa qiimayaasha aan ahayn kuwa Seattle ee loogu talagalay daqiiqadaha iyo maylasha aad gaari ku wadey bannaanka Seattle iyo qiimayaasha Seattle ee loogu talagalay daqiiqadaha iyo maylasha ee aad gaari ku waday gudaha magaalada Seattle. Qiimayaasha ugu yar ee gaadiid-raaca la wadaago waa iskujirka qiimayaasha aan ahayn kuwa Seattle marka la joogo dibadda Seattle iyo qiimayaasha Seattle marka la joogo gudaha magaalada Seattle. TNC waa in ay ku siisaa midkood qiimayaasha iskujirka ah iyo kuwa Seattle ee ugu yaraan safar kasta ee loo baxo, ee mid kasta oo badan.

*Tusaalaha 3: Waxaad gaadiid-raac la wadaago ka bilowday bannaanka magaalada Seattle waxaadna qaadis dheeraad ah ku sameysay bannaanka magaalada Seattle. Marka loo sii socdo goobaha rakaabka lagu dejiyo, waxaad dhex mareysaa magaalada Seattle laakiinse ha joogsanid si aad u qaado ama u dejiso rakaab kasta. Waxaad gaadiid-raaca la wadaago ku joojineysaa magaalada Seattle.*

*TNC waa in ay ku siisaa qiimayaasha aan ahayn kuwa Seattle ee loogu talagalay gaadiid-raaca la wadaago. Gaadiid-raaca la wadaago ka mid ma ahan qaadista ama dejinta gudaha magaalada ah ee kor u qaadeysa qiimayaasha magaalada Seattle.*

## **Bakhshiish**

Bakhshiishka adiga lagu siiyo ayaa waxaa dheer, in aanan loo xisaabin dhanka, shuruudaha qiimaha magdhowga ugu yar ee darawalkaaga.

Dhammaan bakhshiishka waa in lagu bixiyaa muddooyinka lacag-bixinta lagu cayimey gudahooda, ka-dib marka lacag-bixinta laga helo rakaabka. Shirkadaada TNC wax kama jaran karto bakhshiishkaaga, haddii uu sharcigu sidaa dhigayo mooyaane ama si cad loogu oggolaadey qoddobada ka-jaridda iskaaga ah.

## **Rasiidyada Elektarooniga ah iyo Ogeysiisyada Toddobaadlaha ah**

24 saacadood gudahooda ka-dib safar kastoo lagu diro, TNC waa in ay ku siisaa rasiid elektaroonig ah, oo la heli karo isaga oo ah fayl qiimayaashiisu ay kala-saarto hakad lana soo degsan karo ama qaab PDF la baari karo oo uu ku jiro shax leh safar loogu talagalay safar kasta oo gaar ah ama qayb safarka ah iyo joog-u-taxyo loogu talagalay cunsur/wax qodobaysan oo ay ku jiraan rasiidka safarka ee safar kasta ama qayb safarka ah. Rasiidka elektarooniga ah waa in uu qodobeeyaa macluumaadkan soo socda ee loogu talagalay safar ama qayb kasta oo safarka ah:

- Qaddarka guud ee waqtiga madasha rakaabka
- Wadarta guud ee fogaanta mayl ee gaariga la wadey intii lagu guda jirey waqtiga madasha rakaabka
- Qiimayaasha lagu dabakhi karo sida: qiimaha(qiimayaasha) daqiiqad kasta, qiimaha(qiimayaasha) mayl kasta, boqolkiiba lacagta safarka ee rakaabka, iyo wax kasta oo lagu dhuftey qiimaha oo la adeegsan karo ama siyaasadda Sida ku cad xeerarka RCW 49.46.300(7) iyo WAC 296-128-99110(2) shirkadda shabakada gaadiidka waxay ka soo bixi kartaa waajibaadkeeda si ay u qaybiso ogeysiiska qoran ee xuquuqaha darawalada shirkada shabakada qaadiidka iyaga oo ku siinaya ogeysiiskan fudud nidaam la qaari karo.

qiimeynta kala duwan ee dhaqangalka ah oo ay ku jiraan qiimayaasha kala duwan ee lagu saleynayo goobta juqraafi

- Magdhow bakhshiish ah kasta ee uu bixiyey rakaabka 24 saacadood gudahooda ee safarka loo direy
- Lacag-bixin guud
- Lacag-bixinta saafiga ah ka-dib ka-jarista, ujuurooyinka, lacagaha ka gudubka buundo ama jid, lacagaha dheeraadka ah ee qofka la saaro, lacagaha faa'iido wadaaga, ujuurooyinka kirada, iyo lacagaha kale ee la dulsaar
- Ujuurooyinka ama lacagaha laga jarayo ee qodobaysan, oo ay ka mid yihiin lacago kasta ee loo bixiyo ka gudubka buundo ama jid, lacagaha dheeraadka ah ee qofka la saaro, lacagaha faa'iido wadaaga, ujuurooyinka kirada, iyo lacagaha kale ee la dulsaaro.
- Waqtiga iyo taariikhda loo qabanayo safar kasta iyo qayb kasta oo safarka ah.
- Goobaha laga soo qaado rakaabka iyo goobaha rakaabka lagu dejiyo ee safar kasta iyo qayb kasta oo safarka ah ee lagu qeexay wadada, magaalada, iyo gobolka laga soo qaadey rakaabka ama lagu dejiyey rakaabka (haddii rakaabku uu yahay qof da'diisu yar tahay mooyaane).

Ugu yaraan hal jeer toddobaadkii, TNC waa in ay darawalka siisaa ogeysiis qoraal ah, oo la heli karo isaga oo ah fayl qiimayaashiisu ay kala-saarto hakad oo ay ku jiraan macluumaadkan soo socda ee safar kasta ama qayb kasta oo safarka dhacey toddobaadkii hore:

- Wadarta guud ee waqtiga madasha rakaabka
- Wadarta guud ee fogaanta mayl ee gaariga la wadey intii lagu guda jirey waqtiga madasha rakaabka
- Wadarta guud ee magdhowga bakhshiishka ah ee laga helay rakaabka toddobaadkii hore gudahiisa, loo qodobeeyay taariikhda safar kasta ee loo direy ama qaybta safarka loo direy.
- Lacag-bixinta guud ee loo qodobeeyay: qiimaha(qiimayaasha) daqiiqad kasta; qiimaha(qiimayaasha) mayl kasta; iyo hab kasta oo kale ee loo adeegsadey in mushaarka lagu xisaabiyo
- Lacag-bixinta saafiga ah ka-dib ka-jarista, ujuurooyinka, lacagaha ka gudubka buundo ama jid, lacagaha dheeraadka ah ee qofka la saaro, lacagaha faa'iido wadaaga, ujuurooyinka kirada, iyo lacagaha kale ee la dulsaar
- Ujuurooyinka ama lacagaha laga jarayo ee qodobaysan, oo ay ka mid yihiin dhammaan lacagaha loo bixiyo ka gudubka buundo ama jid, lacagaha dheeraadka ah ee qofka la saaro, lacagaha faa'iido wadaaga, ujuurooyinka kirada, iyo lacagaha kale ee la dulsaaro, wadarta guud ee waqtiga madasha rakaabka ee la qabtay gudaha 365 maalmood ee kaalandarka la soo dhaafey.

### **Muddooyinka Lacag-bixinta**

TNC waa in ay sameysaa muddooyin lacag-bixined oo joogto ah oo dhacaya ugu yaraan labadii toddobaadba mar. TNC waa in ay ku siisaa qaddaro kasta ee aad ku leedahay ee ah magdhow, bakhshiish, iyo lacago kasta oo dib-u-bixin ah kama dambeys 10 maalmood oo kuwa kaalandarka ah ka-dib dhammaadka muddada mushaar-bixinta.

### **Ka-jarista iskaaga ah**

Marka laga reebo sida uu sharcigu qabo, TNC waxay keliya ka jari kartaa magdhowga marka aad si cad ugu oggolaato ka- jaridda qoraal oo aadna sidaa kol hore sameyso, una sameyso ujeedo sharci ah. Ka-jarista iskaaga ah waxay yareyn kartaa kasbashooyinkaaga safar kasta ee ka yar shuruudaha magdhowga ugu yar ee lagu dhigey cutubka 49.46 RCW iyo xeerarka la xiriira.

### **Ma jirto lacago looga jarayo waxyaabaha lumey ama jabey**

TNC magdhowgaaga kama jari karto kharashka waxyeellada ama lumidda qalabka shirkadda shabakada gaadiidka, barnaamij software ah, hantida caqliga, ama hantida kale ee la taaban karo ama aanan la taaban karin.

### **Waqtiga Bukaanka ee Mushaarka leh**

Laga bilaabo 1-da Jannaayo, 2023, darawal u shaqeeya TNC ahaan waxaad bilaabi doontaa in ay kaaga ururto ugu yaraan hal saac oo ah waqtiga bukaanka ee mushaarka leh oo la kasbadey 40 saacadood kasta oo ah waqtiga madasha bukaanka ee la shaqeeyay. Waxaad adeegsan kartaa waqtiga bukaanka ee mushaarka leh ee aad kasbatey ee ku ururey marka aad ku diiwaangeliso 90 saacadood oo ah waqtiga madasha rakaabka madasha darawalka ee TNC.

Waa in lagu oggolaadaa isticmaalka maalmaha ururey ee waqtiga bukaanka ee ushaarka leh ee la kasbadey marka ay kororto oo ay gaarto ugu yaraan afar saacadood ama in ka badan.

Saacad kasta ee ah waqtiga bukaanka mushaarka leh ee la kasbadey ee la adeegsadey, waa in lagu siiyaa celceliska qiimaha magdhowgaaga saacadlaha ah.

Waqtiga bukaanka mushaarka leh ayaa loo adeegsan karaa sababahan soo socda:

Sida ku cad xeerarka RCW 49.46.300(7) iyo WAC 296-128-99110(2) shirkadda shabakada gaadiidka waxay ka soo bixi kartaa waajibaadkeeda si ay u qaybiso ogeysiiska qoran ee xuquuqaha darawalada shirkada shabakada gaadiidka iyaga oo ku siinaya ogeysiiskan fudud nidaam la qaari karo.

- Maqnaanshaha ka dhalanaya jirrada dhimirka ama jirka ee darawalka, dhaawaca, ama xaalad caafimaad; ilaa adeegga uu darawalka ugu baahan yahay baaritaanka caafimaadka, daryeelka, ama daaweynta jirrada dhimirka ama jirka, dhaawaca, ama xaaladda caafimaad; ama baahida uu darawalka u qabo daryeel caafimaad oo ka hortag ah
- In loo suurtageliyo darawalka in uu bixiyo daryeelka xubin qoys oo qaba jirro dhimir ama jireed, dhaawac, ama xaalad caafimaad; daryeelka xubin qoys oo u baahan baaritaan caafimaad, daryeel, ama dhabibidda jirro dhimir ama jireed, dhaawac, ama xaalad caafimaad; ama daryeelka xubin qoys oo u baahan daryeel caafimaad oo ka hortag ah.
- Marka iskuulka ama goobta daryeelka carruurta darawalka lagu xiro amar ka soo baxay sarkaal dowladeed oo loogu talagalay sabab kasta oo caafimaadka la xiriira
- Maqnaanshiyaha shaqaalaha uu xaq ugu yeelanayo Fasaxa Tacaddiga Reerka iyo Qoyska Ka Dhex Dhaca ee waafaqsan xeerka RCW 49.76.030
- Inta lagu guda jiro hawl-ka-joojinta, haddii hawl-ka-joojinta ama xaaladdu ay sabab u tahay eedaynta xaqiijinta dhibaateyn galmo ama dhibaateyn jireed ee uu ku kacay darawalka mooyaane.

Waa in aad heshaa lacag-bixinta waqtiga bukaanka ee mushaarka leh ee aad codsatey kama dambeys 14 maalmood oo kuwa kaalandarka ah ka-dib codsiga ama taariikhda joogtada ah ee magdhowga loo jadwaleeyay ee soo socota.

TNC waa in ay kuu oggolaataa in aad codsato oo aad ku isticmaasho waqtigaaga bukaanka ee mushaarka leh nidaamka lagu heli karo luuqad kasta ee u dhiganta ugu yaraan 2% ee bulshadooda darawalada. Nidaamka waa in aad heli kartaa adiga oo adeegsanaya barnaamij ku shaqeeya telefoonnada casriga ah iyo bart internet-ka ah.

TNC waa in ay kuu oggolaataa in aad u wareejisato waqtiga bukaanka ee mushaarka leh ee aanan la adeegsan oo dhan ilaa 40 saacadood sannad kaalandarka ku xiga sannadkaasi. Haddii aad u wareejiiso waqtiga bukaanka ee mushaarka leh ee la kasbadey ee aanan la isticmaalin sannadka soo socda, ururka waqtiga bukaanka ee mushaarka leh ee la kasbadey ee sannadka xiga waa in lagu kordhiyaa saacadaha ururey sannadkii la soo dhaafey lana soo wareejiyey.

Waxaad xaq u leedahay in aad isticmaasho waqtiga bukaanka ee mushaarka leh haddii aad u isticmaashey madasha TNC darawal ahaan 90 maalmood oo kuwa kalaandarka ah gudahooda codsigaaga ka hor.

TNC waxaa laga yabaa in aysan qaadin wax tallaabo ah oo adiga kaa dhan ah oo si xun u saameynaya isticmaalkaaga shabakada gaadiidka oo sabab u ah adeegsiga wax ka mid ah xuquuqahaaga Xeerka Mushaarka Ugu Yar, oo ay ku jiraan xuquuqahaaga Waqtiga Bukaanka ee Mushaarka leh.

### **Aargoosigu Waa Mamnuuc**

TNC kuuma geysan karto aargoosi sabab u ah adeegsigaaga wax ka mid ah xuquuqahaaga Xeerka Mushaarka ee Ugu Yar, oo ay ka mid yihiin:

- Adeegsiga xuquuqahaaga ee magdhowga ugu yar, bakhshiishm iyo waqtiga bukaanka ee mushaarka leh
- U soo gudbinta tallaabo ama cabasho Waaxda Shaqada iyo Warshadaha
- Adeegsiga Xarunta Kheyraadka Darawalka

TNC ma qaadi karto tallaabo xun oo adiga kaa dhan ah, sida hawl-ka-joojinta akoonkaaga, xadiddida gelidda akoonkaaga, wax-ka-beddelka qiimayaashaada mushaarka, ama in ay kuu diido kala beddelka heerka fursadaha qiimaha magdhowga iyada oo sabab u ah in aad adeegsatey xuquuqahaaga ee waafaqsan cutubka 49.46.

TNC ma yeellan karto siyaasad kasta ee tirineysa isticmaalka la oggol yahay ee waqtiga bukaanka ee mushaarka leh sida maqnaansho horseedi karta ama keeni karta in akoon kasta hawsha laga joojiyo ama tallaabo kale oo xun oo adiga kaa dhan ah.

### **Soo-gudbinta Cabasho**

Darawal ahaan, waxaad xaq u leedahay in aad cabasho u soo gudbiso Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (L&I) haddii shirkadaada shabakada gaadiidka ay ku xadgudubto shuruudaha RCW 49.46 ama xeerarka la xiriirka ee ku saabsan:

- Magdhowga
- Waqtiga Bukaanka ee Mushaarka leh
- Bakhshiish
- Aargoosi

Waxaad Cabashada Xuquuqaha Darawalka ugu soo gudbin kartaa waaxda L&I:

Sida ku cad xeerarka RCW 49.46.300(7) iyo WAC 296-128-99110(2) shirkadda shabakada gaadiidka waxay ka soo bixi kartaa waajibadkeeda si ay u qaybiso oqeysiiska qoran ee xuquuqaha darawalada shirkada shabakada gaadiidka iyaga oo ku siinaya oqeysiiskan fudud nidaam la qaari karo.

- Online-ka: [lni.wa.gov/tncdrivers](http://lni.wa.gov/tncdrivers)
- Boostada: Foomka Cabashada Xuquuqda Darawalka
- Booqo goobta xafiiska [L&I ee kuugu dhow](#)

### **Xarunta Kheyraadka Darawalka**

Xarunta Kheyraadka Darawalka ee gobolka oo dhan ayaa ka shaqeysa ka caawinta darawalada hannaannada rafcaannada hawl-ka-joojinta iyo dheefaha kale ee la siiyo darawallada. Darawalada qaba su'aalaha ama walaacyada hawl-ka-joojinta waa in ay kala xiriiraan Xarunta Kheyraadka Darawalka.

Email-ka: [support@driversunionwa.org](mailto:support@driversunionwa.org)

Telefoonka: (206) 812-0829

Cinwaanka: 14675 Interurban Ave. South, Suite 201, Tukwila, Washington 98168

### **Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (L&I) ee Gobolka Washington**

Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ee Gobolka Washington waxay bixisaa kaalmo farsamo bilaash ah, buug-yareyaal, warqado xog xambaarsan, iyo kheyraadyo waxbarasho kale oo ku saabsan xuquuqahaaga sida darawalka shirkadda shabakada gaadiidka.

Mareegtada: [lni.wa.gov/tncdrivers](http://lni.wa.gov/tncdrivers)

E-mail-ka: [tncdriversupport@lni.wa.gov](mailto:tncdriversupport@lni.wa.gov)

Telefoonka: (360) 902-5316

Booqo: goobta xafiiska [L&I ee kuugu dhow](#)